

# **XEER WASAARADDA ISGAARSIINTA IYO GAADIIDKA**

**Lamb. 89 ee 1 Juun 1967**

**Caalaamoyinka gaadiidka berriga ee badeecadaha iyo tariifadaha**

## **WASIIRKA**

Kadib markii la arkay qod. 77 iyo faqradda 2aad ee qod. 83 ee Dastuurka:

Kadib markii la arkay dekreeto-sharci lamb 1 ee 7 Febarayo 1965 ee la xiriirta wax ka bedelka sharciga lamb 14 ee 1 Juun 1962 ee khuseeysa xeerka nidaamka Dowladda.

Kadib markii la arkay qoraalka lamb MCT-CT-I-T ee 28 Janaayo 1967 ee Guddia halkaa la dhisi doono.

Kadib markii la garoowsado baahida in la isku duba riddo howlaha gaadiidka berriga ee badeecaadaha ee dalka gudahiisa.

Kadib markii la dhegeystay soo jeedinta Guddiga sare ku xusan.

## **WUXUU XEEREYAY**

### **Qod. 1**

Waxaa qasab loogaa dhigay shirkadaha dowliga ah iyo kuwa sida gaarka loo leeyahay in aay soo gaarsiyan Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Gaadiidka - Waaxda Gaadiidka Madaniga ah, heshiis kasta oo horay u jiray iyo kuwa cusub ee la xiriira gaadiidka qaada badeecadaha iyo qalabka oo noc kasta ama xad kasta leh.

Waaxda Gaadiidka Madaniga ayaa si gaar ah u leh awoodda la kala qeybiyo xamuulka ka yimaada Hey'addaha dowliga ama si gaarka loo leeyahay, ee shirkadaha iskashatooyinka gaadiidleyda ee la xiriira adeegaasi.

### **Qod. 2**

Waxaa lagu dejiyey tarifadda gaadiidka badeecooyinka oo sida u dhaqsida badan u hirgelayaa, shaxda halkaan ku lifaaqan.

### **Qod. 3**

Iyadoo lala tashanayo Waaxda Gaadiidka Madaniga iyo iyadoo la tixgelin doono shaxda tarifooyinka, waxaa la qiyaasi doona tarifada goobaha aan lagu tilmaamin shaxda dekreetan ku lifaaqan si loo helo tarrifada u qalanto inta kilomitir ee dheerad ku ah.

### **Qod. 4**

Dekreetadaan waxay hirgeli doontaa maalinta lagu daabaco Faafinta Rasmiga ee Somaliya.

Muqdisho, 1 Juun 1967.

Wasiirka  
**Aden Issak**

---

**SHAXDA TARIIFADDA GAADIIDKA BERRIGA EE UU GUDDIGA LOO  
XISAARAY GO'AAMIYEY**

---

Muqdisho	— Jowhar	hal Kintaal	Sh.	So	2,50
“	— Cadale	“	“	“	7,00
“	— Bulo Burde	“	“	“	6,00
“	— Ceel Buur	“	“	“	10,00
“	— Dhusamareb	“	“	“	12,00
“	— Ceel Dheer	“	“	“	8,0
“	— Galkacyo	“	“	“	18,00
“	— Garowe	“	“	“	23,00
“	— Qardho	“	“	“	27,00
“	— Bosaso	“	“	“	35,00
“	— Iskushuban	“	“	“	40,00
“	— Belet Weyn	“	“	“	8,00
“	— Fer fer	“	“	“	12,00
“	— Afgoye	“	“	“	1,50
“	— Wanle Weyn	“	“	“	3,00
“	— Bur Hakaba	“	“	“	6,00
“	— Baydhabo	“	“	“	7,50
“	— Luq Ganane	“	“	“	13,00
“	— Dolow	“	“	“	15,00
“	— Waajid	“	“	“	10,00
“	— Xuddur	“	“	“	13,00
“	— Bardhere-Dinsor	“	“	“	10 -11
“	— Danane	“	“	“	2,0
“	— Marka	“	“	“	2,50
“	— Barawe	“	“	“	6,00
“	— Kismayo	“	“	“	12,00
“	— Jilib	“	“	“	10,00
“	— Jamama	“	“	“	11,00
“	— Warsheikh	“	“	“	2,0
“	— Eyl	“	“	“	25,00
“	— Hobyo	“	“	“	20,00
“	— Qoryoley	“	“	“	3,00
“	— Bender Beyla	“	“	“	30,00
“	— Adan Yabal	“	“	“	8,00
“	— Las Anod	“	“	“	23,00
“	— Burco	“	“	“	26,00
“	— Hargeysa	“	“	“	30,00
“	— Borame	“	“	“	33,00
“	— Zeylac	“	“	“	40,00
Burco	— Cerigavo	“	“	“	10,00
“	— Berbera	“	“	“	5,00

Hargeysa	— Berbera	“	“	“	6,00
Burco	— Buhodle	“	“	“	4,00
“	— Garacad	“	“	“	4,00
“	— Odweyne	“	“	“	4,00
Hargeysa	— Gabiley	“	“	“	3,00
Cerigabo	— Las Qorey	“	“	“	12,00

Haben dhaxa gaariyada leh daboolka iyo kuwa aan dabooleneyn.

Ilaa 6 tan	haben kasta oo	la dhaxo	Sh.	So.	150,00
7 tan ilaa 8	“	“	“	“	180,00
in ka badan 10 tan	“	“	“	“	200,00
Baabuurta is jiidka ah	“	“	“	“	300,00

Muqdisho, 30 Janaayo 1967.

**Aden Abdulle Osman**

Rai'sul Wasaaraha

**Abdirizak Haji Hussein**

Wasiirka Beeraha iyo Xanaanada Xoolaha

**Mohamud Abdi Nur**